

## Qaadista talaabada ky saabsan caymiska

Janaayo 26, 2023

Dowladda Alberta waxay hakisay kordhinta qiimaha caymiska gaadiidka gaarka loo leeyahay ilaa dhammaadka 2023.

Dad badan oo reer Alberta ah ayaa muujiyay walaac dheeraad ah oo ku saabsan awood u yeelashada caymiska baabuurta gaarka ah marka loo eego dhibaatada sicir bararka ee hadda jirta. Ka sokow hakinta kordhinta qimaha illaa dhammaadka 2023, dawladda Alberta waxay sii wadi doontaa horumarinta xalalka dhow iyo kuwa fog ee heerarka caymiska baabuurta ee joogtada ah iyo qiime hooseeya.

In kasta oo aan kor u kac cusub aan la ansixin doonin inta ka hartay sanadkan, darawalada reer Alberta qaarkood ayaa laga yaabaa inay wali arkaan kororka dib u cusboonaysiintooda 2023. Tan waxa laga yaabaa inay sabab u tahay isbeddelada sicirka ee hore loo ansixiyay, isbeddelada diiwaanada wadista oo ay ku jiraan sheegashooyinka khaladka ah iyo tigidhada , ama isbedel lagu sameeyo galka caymiska sida ciwaanka cusub ama baabuur kale oo la caymiyay.

Dowladda Alberta waxay sidoo kale maqashay welwelka ah in dadka reer Alberta qaar ka mid ah ay la kulmeen caqabado ah inay si buuxda u bixiyaan khidmadaha caymiska baabuurta ee sannadlahaa ah. Si taas looga caawiyo wax ka qabashada, dawladdu waxay u baahan tahay shirkadaha caymisku inay siiyaan inta badan dadka ree Alberta awood ay ku bixiyaan khidmadaha ay ku leeyihiiin qorshooyinka lacag bixinta.

Dowladda Alberta waxay hirgelisay dib u habayn deyrtii 2020, kuwaas oo la filayo inay sii dejiyaan heerarka. Si kastaba ha ahaatee, arrimaha sida sicir bararka iyo arrimaha silsiladda sahayda ee qaybaha baabuurta ayaa saameeyay saamaynta dib u habaynta muddada gaaban.

Suuqa caymiska ee Alberta si dhow ayaa loola socdaa, dawladduna waxay sii wadi doontaa inay eegto ikhtiyaarrada hagaajinta dheeraadka ah.

## Talooyinka macaamiisha

- Suuqa tartanka ee Alberta, dadka reer Alberta waxay inta badan heli karaan heerar ka wanaagsan iyaga oo wax ka iibsanaya agagaarka oo sahamiya doorashooyinkooda ku saabsan qiimaha ugu fiican.
- Dadka reerka Alberta waa in ay sii wadaan la shaqaynta shirkadahooda caymiska ama dilaaliinta si ay u helaan qiimaha ugu fiican.
- Darawalada reer Alberta waxay heli karaan qiimo dhimis ilaa 20 boqolkiiba ah isku darka caymiska gurigooda iyo hantidooda, marka lagu daro qiimo dhimis loogu talagalay habdhaqanka wadida wanaagsan.
- Alberta waxay leedahay nidaam ilaalin u gaar ah macaamiisha nidaamka qiimaynta fiican. Caymisyadu waa inay eegaan adeegaha khadka iyo khidmadaha iyaga u gaar ah oo ay ku dallacaan qiimaha yar ee caymiska aasaasiga ah ee baabuurta

## Xog la xiriirta

- Caymis ([Insurance](#))
- Kormeeraha Wargeesyada iyo Ogeysiisyada Caymiska ([Superintendent of Insurance Bulletins and Notices](#))
- Guddiga Qiimaha Caymiska Baabuurka ee Alberta ([Alberta Automobile Insurance Rate Board](#))
- Xisaabiyyaha Heerka Caymiska Baabuurka ([Auto Insurance Grid Rate Calculator](#))
- Qorshe Hawleedka La awoodi karo ([Affordability Action Plan](#))